



ICRC

CIDDA AAN NAHAY IYO WAXA
AAN QABANO

SI KOOBAN

HUMANITARIAN
access



ICRC

CIDDA AAN NAHAY

Guddiga Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas waa urur madaxbanaan, dhex-dhexaad ah, oo ka shaqeeya ilaalinta nafta iyo sharafta dadka ay dagaallada iyo qalalaasuhu saameeyeen, iyo caawintooda. Wuxuu ay sidoo kale aad ugu dadaashaa ka hortagga dhibaatooyinka iyada oo kor u qaadeysa shuruucda bani-aadamnimada.

Shaqaalaha ICRC-du waxa ay dadka oo dhan ku la dhaqmaan heerka ugu sarreeya ee anshaxa iyo ixtiraamka.

WAXA AAN QABANO

1. Waxaan dhageysanaa lana hadalnaa

dadka ay colaaddu saameysay si aan u fahano baahidooda.



2. Waxaan caawinaa bulshooyinka ay
colaadaha iyo rabshooyinku saameeyeen,
annagoo siina cunto iyo waxyaabah
aasaasiga ah, biyo nadiif ah oo la heli
karo, adeegyada caafimaadka aasaasiga
ah iyo dib-u-dhiska kaabeyaasha
dhaqaalaha, iyo kuwo kale.



3. Waxaan caawinaa dadka ka
badbaaday rabshadaha la xiriira jinsiga

4. Waxaan bixinaa taagero caafimaad oo
dhinaca maskaxda ah



5. Waxaan gacan ka geysanaa in ay
dib-u-midoobaan qoysaska ku kala luma
rabshadaha hubeysan iyo tahriibka



**6. Waxaan la hadalnaa dhammaan
dhinacyada hubeysan innaga oo u
sharraxna **in aan marnaba la beegsan
dadka rayidka ah****



WAXA AANAN SAMEYNIN

1. Ma jiro dhinac aan la safano colaadaha



2. Ma jirto cid aan takoorno



3. Gaadiidkeena hub ama dad hubeysan kuma qaadno



4. Xogaha qarsoon lama wadaagno

dhinacyada colaadda

5. Xog uma ururino hey'ado kale ama

saxafiyiin

6. Kama qeyb qaadano baaritaano ama

howlo maxkamadeed

7. Adeegyadeena lacag kuma qaadano



ICRC-du waxa ay caawisaa dadka Adduunka dhan oo ay saameeyeen colaadaha hubeysan iyo rabshadaha kale, iyada oo sameyneysa wax kasta oo ay awooddo si ay u ilaalso sharaftooda sidoo kalena yareyneysa dhibaatadooda, iyada oo inta badan kaashaneysa saaxiibada Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas. Hey'addu waxa ay sidoo kale ku dadaashaa sidii ay ku yareyn laheyd dhibaatada iyada oo kor u qaadeysa oo xoojineysa sharciga bini'aadamnimada sidoo kalena hormuud u noqoneysa mabaadi'da caalamiga ah ee bini'aadamnimo.



ICRC

- f** facebook.com/ICRCAfrica
- X** twitter.com/icrc_Africa
- IG** instagram.com/icrc_somalia/
- ↗** blogs.icrc.org/Somalia

© ICRC, June 2022
www.icrc.org